



# READ

ANAKOO WADA JOOGNA AAN  
WAX ISLA AQRISANNO  
DA'ADA 3 – 4 JIR.



# KUSOCOTA WAALIDIINTA

Markaad cunugaaga wax u aqrinayso ama wax la qorayso, amaba aad kala hadlayso wax ku saabsan buugaag, ogoow waxaad xoojinaysaa cunugaaga luuqadiisa amaba aqoonta uu uleeyahay buugaagta ama qoraalka. Taasina waa mid macno uleh, sida cunugaagu ula hadlaayo dadka kaleeto iyo fahamka oow uyeelanaayo aduunyadaan noloshiisa ku xeeran.

Boorasadaan aan ku siinaynana, waxaan la rabnaa inaan kugu dhiiri gelino, sidii aad cunugaaga wax ugu aqrin lahayd ama aad cunugaaga ula hadli laheed.

Boorsadaan iyo qalabka kaloo la socda waa haddiyo aan rabno inaad qaadatiin aadna haysatiin.





## BOORSADA WAXAA KU DHEX JIRA:

- 3 ex bug
- Qoraalo kaleeto, kuwaasoo muhiim ay tahay inaad cunugaaga u aqriso.
- Bookmark wata fariimo muuqda, ahna sidii aad cunu-gaaga wax ugu aqrin lahayd.
- Hal kuboon oo ku siinaaya buug dheeraada, lacag la'aana, kaasoo aad ka qaadan karto mактабадда xafadaada ku taal.
- Ciyaar iyo xeerarka ciyarta.

Buugaagta ku jirta boorsadaan waa buugaag marar badan la aqrin karo, markasatana aad amaahan kartiin buugaag kaleeto, kana amaahan kartiin maktabadda xaafadiina ku taal.



Waxaad iga heli kartaa anoo tarjuman bogga:  
[www.aarhus.dk/read](http://www.aarhus.dk/read)







## ADIGA WAALIDKAAHU AAD AYAAD MUHIIM UTAHAY, SABABTO AH:

- Wuxaan xoojinaysaa cunugaaga luqadiisa, markaad wax u aqrinayso iyo markaad cunagga kala hadlayso buugaagta.
- Heer kasta oo cunugaagu luuqadda ka jo-ogo, ka waalid ahaan waxbaad luuqadiisa ku kordhin kartaa.

# ILMAHAAGA WAX U AQRI AMA LA AQRISO



Sidoo kale waa wax aad ufiican oo la jeclaysto inaad cunugaaga buugag kala duwan marar badan u aqriso.

Umana baahnid inaad wax aqrinta ku fiican tahay, si aad wax ugu aqriso. Kana sii fiican hadada buugaag kala duwan aqrisatiin, sida bug-masawireed. Maadaama ku celcelinta isla buugi ay xoojinayso cunugaaga barashadiisa xuruufo tiro badan iyo inoow fahmaba nuxurta buugga aad ugu celcelisay waxa ku qoran.



AAN UDHAMAAANNO  
WAX AQRINTA.

- Farta ku taag masawirka ama xuruufta aad aqri-nayso
- Xitaa waa la ogolyahay inaad alifto sheeko aad ku cabirayso masawirka kuu muuqda, xitaa usuurta geli in cunugaagu wax ka alifo.
- Maalin kasta samayso waqtii aad uqorsheeysay inaad cunugaaga wax ugu aqriso amaba usheekeeyso.



# USHARAX CUNUGAAGA BUUGAAN AAD U AQRINAYSOO

Waa fiicnaan lahayd inaad cunugaaga usharaxdo buugaani waxa uu yahay ka hor intaadan bilaabin ama ka dib markaad buuga u aqriso. Sababtoo ah uga sheekayntu waxeey xoojinaysa cunugaaga luuqadiisa, iyo ogalka oow uyeelanaayo caalamka, waxeey kaloo usahleeysa inoow faham uyeesho nuxurka buugga. Waxaad ka wada hadli kartiin masawirka idii muuqda, ficolka iyo xarfahaba. Waana fiican tahay inaad isweeydiisaan su'aalo furan iyo su'aalo kaloo wax ogaansho ahba. Si markaas cunugaagu ujecleysto, hadallo iyo su'aalana kuu weeydiyo.

Waxaad kaalmo wax aqrineed ka heli kartaa ka heli kartaa buug-mark'bogmærket'

**KA HOR**

Maxaad isleedahay oo  
buugu- ku saabsan yahay



**INTA LA HADLAYO**

"Waxa la yiraa dallad,  
ma ogtahay waxa dal-  
ladaan loo isticmaalo"



**KADIB**

"maxeey ahaayeenad  
isleedahay wixii aad  
jecleeysatay"

"Aad u orod badan"

"Haa Mimbo Jimbo  
aadow u orod"



- Xooga yara hakiya wax aqrinta oo ka hadla masawirkha idin muuqda, ficalkaba intaad wax aqrinta ku guda jirtiin.
- Usharax cunuga ereyada ku cusub ee uusan horey u maqla.
- Weeydii su'aalo furan, ja-waabtiisana ogolow.
- Waqtii ku filan sii cungugaagu oow su'aalah uga jawaabo.



**LUUQAD BADAN  
OOD KU HADASHAA  
WAA HANTI ALLE  
KU SIIYAY.**



Hadii aad ku hadshiin luuqad kale oon danish ahayn, waad ku hadli kartiin luuqadaas markaad buugga aqrinaysiin. Isticmaal luuqada aad ku hadalkeeda ku fican tiihin. Wuxaad ka wada hadli kartiin xarfaha iyo weeraha aad ku aragtiin buugga, ha noqoto luuqadda aad udhalateen ama midda daanishka.



AAN UDHAMAAANNO  
WAX AQRINTA.

- Xasuusnow iney wax fiican tahay, inaad taqaan luuqado badan.
- Wuxaan ka wada hadli kartiin xarfaha iyo weera-ha aad ku aragtiin buugga, ha noqoto luuqadda aad udhalateen ama mappaan daanishka.

# KAWADA SHEEKEYSIGA BUUGGA



Waa inaad abuurto jewi fiican oo la jeclaysto adiga iyo cunugaaga markaad buugga wada aqrinaysaan.

Sariirta geeskeeda, kursiga fadhiga iyo dhulkaba wax ugu aqri adinkoo aad iskugu dhow, suurtagalna haday tahay aad indhaha isku heeysiin. Xitaa hadeey suurtagal tahay walaalaha kaleeto kusoo dar wax aqrinta. Waxaa kaleeto aad iska damisiin wixii kaloo idin qasaaya, sida telefishanka iyo telefonka.



- U aqri bog ka mida baalasha buuga oo la jeclaysto, uguna aqri meel deggan.
- Aad iskugu dhawaada adiga iyo cunugaba intaad wax aqrinaysiin.
- La soco oo fiiro uyeelo cunugaaga wax ogaanshahiisa, kana wada hadla waxa markaas fiiradiisu danaynayso ee uu rabo.
- Qasab maahin inaad buugga oo dhan wada aqrisiin.



## CIYAAR OO LA DHEEL ILMAHAAGA



Kasokow wax u aqrinta cunu-gaaga, waad la ciyaari kartaa iyo kula dheelidda waxyaabo kaleeto. Cunuga waa umaad/shactiro iyo waxbarsho kaloo ula jirta. Tusaale waxaa kula dheeli kartaa jillida dadka aad buuga ku aragtiin. Ama waxaad kuwada dheeli kartiin ciyaaraha aad buugga ku aragtiin, halkaasoodba uga wada hadli kartiin erezaya iyo masawiradda aad buugga ku aragtiin.

- Sida Baqtiyaanasiibka iyo dheel-xasuuseedka.  
Qoraalka buugga waxaad ka heli kartiin dheelo aad ujili kartiin qaabab kala duwan.

A young girl with blonde hair tied in a bun is sitting at a wooden table, playing a matching game with cards featuring cartoon animals. She is wearing a pink striped shirt and a blue bow tie. A woman with long brown hair, wearing a green dress, is smiling at her from the left. A man with a beard and a dark shirt is visible behind her, also looking at the game. Two speech bubbles are present: one above the girl containing the text "Maxaad masawirka ku aragtaa" in teal, and one below her containing the text "Maroodi" in teal.

"Maxaad  
masawirka ku  
aragtaa"

"Maroodi"



## **WAX LA MASAWIR IYO WAX LA QOR CUNUGAAGA**

Markaad wax la qorayso, wax la masawireeyso, la sheekeysanayso cunugaaga. Wuxuu baranaaya cunugaagu sidii uu xiriir qoraaleed dadka ula samayn lahaa. Lacalla wax baad umasawiri kartiin aad soo aragteen, ama waxaad masawiri kartiin waxaad buugga ku aragteen. U ogolaada cunugiinu inoow wax xariiqimo xariiqimaa(jacbur) oow qoro ama isku dayo xarfo inoow masawirka ku muujiyo. Adiga xitaa ereyo ama jumlooyin ayaad ku qori kartaa luuqado kala duwan.



"Maxaad jeelaan laheeyd  
inaan masawirno."



AAN UDHAMANNO  
WAX AQRINTA.

- Miiska hortiina soo dhig qalimo, kalooraati iyo warqado( sida miiskiina qadada oo kaleeto) si markaas markastaba oow diyaar idin ahaado sidii aad wax umasawiri laheeydeen, qori lahay-deen, xitaa uwada sheekeysan lahaydeen.
- Xarfo iyo weero kala duwan ku qora luuqado kala duwan, kadibna kawada hadla xarfahaas iyo sida dhawaqaqoodu ukala duwan yahay.
- Tus cunugaaga inaad wax aqrin iyo wax qori kartidba.



## SOO HELA BUUGAAG BADAN

Waa muhiim inaad guriga ku heeysatiin buugaag badan oo cunugiinu kaligiis gaari karo.


Adiga iyo cunugaaguba waxaad buugaag badan kasoo deeynsan kartaan matabadda xaafadda. Makatabadda xaafaddu ayagaaba diyaar idiinla ah iney idinka kaalmeeyaan sidi aad ku heli laheeydeen ood umaahan lahaydeen buugaag badan oo ku qoran luuqado kala duwan.



Qoraalka waxaa la socda kuboон yar. Markaad Maktabadda ku celisiin, waxaa leeydin soo siin doonaa hadiyo.

Waxaad fikradaha buugaag kaleeto ka heli kartiin bogga internetka [www.aakb.dk](http://www.aakb.dk).

Qayuulka elektoronikadana waxaad ka heli kartiin ama ka amaanah kartiin buugaag iyo cajalado kaleeto oo elektoronika ah.





## KA AQRISO WAX BADAN OO KU SAABSAN READ

Waxaad wax badan ka aqrisan kartaa READ,  
kuna saabsan – aan uwada jirno wax aqrinta iyo  
qoraalo kaleeto oo ku qoran luuqado kala duwan,  
waxaadna ka heli kartaa bogga internetka ee  
[www.aarhus.dk/read](http://www.aarhus.dk/read).